

## Doorashada Kursi Baabuur oo Waafaqsan Shuruucda loogu Talagalay Ilmahaaga

### HAGAHA DEGDEGGA AH EE WAALIDIINTA IYO DARYEFLAYAASHA

#### Markaad Hesho Kursi Baabuur oo Cusub:

- ✓ Akhri buugga tilmaamaha si aad u barato sida uu u shaqeeyo.
- ✓ Ku tababar sida kursiga loogu rakibo gaarigaaga.
- ✓ Ku tababar sida loo xiro ama loo hagaajiyo suunka ilaalinta
- ✓ Iska diiwaangeli kursiga shirkadda soo saartay.
- ✓ Ku hubi kursiga Farsamayaqaan Badbaadada Rakaabka Carruurta (CPST).

#### Maxaa Laga Raadiyaa Kursi Baabuur oo Waafaqsan Shuruucda Mareykanka:

✓ Calaamadaha (oo ku qoran af-Ingiriisi)

✓ Ka iibso Kaliya Meel La Aamini Karo

Ku ekaaw dukaamada si fiican loo yaqaan ama mareegaha shirkadda soo saarta. Ka fogow iibiyayaasha dhinac saddexaad ee internetka.

✓ Kaarka Diiwaangelinta iyo Buugga Tilmaamaha waa in lagu daraa kursiga


✓ Xabada Xabadka (Chest Clip): kuraasta baabuurta ee Mareykanka waxay adeegsadaan xabada xabadka lagu xiro oo leh suuun 5-dhibcood ah

#### HUBI KURSI BAABUURKAAGA EE ILMAHA:

- ✓ Lambarka Moodelka / Taariikhda Soo Saarista
- ✓ Magaca Soo Saaraha / Xogta Xiriirka
- ✓ Xadka Miisaanka / Dhererka: rodol iyo inji
- ✓ Saxanka Birta ee kala qaybiyaha ee dhabarka kursiga\* (haddii uu khuseeyo)
- ✓ \* Kuraasta baabuurta ee leh suunka ilaalinta ee aan dib loo marinin (no-retchard harness) mararka qaar saxanka kala qaybiyaha lagama arko, sababtoo ah waxay adeegsadaan nidaam gudaha ah oo hagaajiya suunka.
- ✓ Shahaado loogu talagalay in diyaaradda lagu isticmaalo\*\* (haddii uu khuseeyo) \*\*Dhammaan kuraasta baabuurta looma samayn in lagu isticmaalo diyaaradaha.
- ✓ Qoraalka: "Nidaamkan kursiga ilmaha wuxuu u waafaqsan yahay dhammaan heerarka badbaadada ee khuseeya ee Federaalka ee Gawaarida Wadooyinka."




Hubi in Kursiga Baabuurta Ilmaha Dib Loo Yeerin (Recall) Lagu Sameeyay <https://bit.ly/4mVSQM6>



Ku Hubi Kursigaaga Farsamayaqaan Badbaadada Rakaabka Carruurta (CPST) <https://bit.ly/3Psp9IY>

FIND A LINK TO AN UP-TO-DATE LIST OF APPROVED CAR SEATS ON THIS WEB PAGE!



Helitaanka & Rakibidda Kursiga Baabuurka Ilmahaaga <https://bit.ly/3Zj5Z7C>

## SIDA LOOGA GARAN KARO KURSIYADA BAABUURTA EE AAN WAFQSANAYN SHURUUCDA




**Shahaadooyinka Ajaanibta ah MA AHA kuwa u waafaqsan Mareykanka**

**Kuraas baabuur oo qaar ayaa u muuqan kara kuwo sharci ah, balse waxaa loogu talagalay heerar kale sida Yurub (tusaale ahaan: iyada oo aan lahayn xabadka xabadka lagu xiro) Kursiyadan sharci ahaan looma isticmaali karo gudaha Mareykanka.**

Maadaama kuraasta aan badbaadada lahayn iyo kuwa aan waafaqsanayn shuruucda ay si fudud suuqa ugu soo kordhayaan, waa inaan aad uga taxaddarnaan marka aan dooranayno kursiga baabuurta ilmaha.

### Kuraasta Baabuurta ee Mareykanka Waafaqsan Waa In uu:

Iswirrada la muujiyay waa tusaale kaliya, mana taageerayaan soo saarayaal gaar ah oo kursiga baabuurta ah. Kursi kasta wuxuu leeyahay kala duwanaansho yar oo u gaar ah.



### CALAAMADAHA DIGTOONAANTA EE KURSIYADA BAABUURTA ILMAHA:

- ✗ Ma lahan Calaamado Badbaado oo Mareykanka ah
- ✗ Calaamadaha oo kaliya ku qoran luqado kale ama leh higgsaad iyo naxwe liitag
- ✗ Calaamadaha oo keliya sawirro muujinaya Suunka ilaalinta (harness) oo aan lahayn xabad xabadka lagu xiro (chest clip)
- ✗ Kaarka Diwaangelinta iyo Buugga Tilmaamaha oo maqan
- ✗ Magaca soo saaraha oo aanad aqoon (gaar ahaan haddii uu ku saleysan yahay dibadda)
- ✗ Qiimo aad u hooseeya ama lagu iibiyo iibiyaha saddexaad ee aan la aqoon

Haddii aad u malaynayso in aad iibsatay kursi baabuur oo aan waafaqsanayn shuruucda, jooji isticmaalka isla markiiba oo la xiriir Farsamayaqaan Badbaadada Rakaabka Carruurta (CPST) si aad u hesho talo.

**Ma hubtaa in kursigaaga baabuurku uu waafaqsan yahay?** Ha welwelin, adiga kaliya ma tihid, waxaana jira caawimo!

La xiriir Farsamayaqaan Badbaadada Rakaabka Carruurta oo shahaado leh ama jadwal u samee hubinta kursi bilaash ah.

Wixii faahfaahin dheeraad ah, booqo [BuckleUpMN.org](http://BuckleUpMN.org)